

Baadhitaanka Naaska

Maxaa dib la iigu yeedhay?



Breast Screening

Maxaa ku dhaca 100 haween ah wakhti kasta oo ay qaataan baadhitaan naaska ah?



Maxaa ka dhaca rugta caafimaadka qiimaynta naaska?

Sababta laguugu marti qaaday rugta caafimaadka waa lagu sharixi doonaa markaad timoodo kadib. Sidoo kale waxaa lagu waydiin doon wixii dhibaatooyin naaska ah, waxaana lagu siin doonaa fursadda aad su'aalo ku waydiiso.

Tiro baadhitaana ah ayaa la fulin doonaa, laakiin uma baahnid dhamaantood. Baadhitaanada waxaa ka mid:

- baadhitaanka naasaha oo uu dhakhtar sameenayo;
- raajadda naaska (Sawirka naaska) taas oo muujinaysa geeso kala duwan ee naaskaaga
- Altrasownd –baadhitaan aan xanuun lahayn oo muujiya sawirka nuddaha ee ku jira naaska;
- Ka jarista cad yar – muunad yar oo nudda naaska ah ayaa lagu qaadi karaa irbad si loogu baadho waynayso. Tan waxaa lagu fuliyaa dawo suuxdinta ah taas oo dareenka ka qaada qaybta loo baahanyahay.
- Baadhitaan fiican oo irbadda – dhowr unug baa loogaga jarayaa naaska irbad aad u wanaagsan oo lagu baadhay waynayso. Baadhitaanku waxa uu la mid yahay sidii dhiig la qaadayo.

Waqti intee le'eg ayay booqashadan qaadanaysaa?

Fadlan u diyaar garow in aad ku qaadato ugu yaraan 2 saacadood rugta caafimaadka; inkastoo tan aanay inta badan muhiim ahayn.

Qof ma soo kaxaysan karaa?

Haa, waad soo kaxaysan kartaa qof sida lammaane, qaraabo ama saaxiib in uu ku soo raaco, qofkanna waxaa laga yabaa inuu noqdo mid ku caawiya.

Goormaan helayaa natiijooyinka?

Tani waxay ku xidhantahay baadhitaanka aad u baahantahay, natiijooyinka qaar waxaa lagu sheegi doonaa ka hor intaandan ka tegin rugta caafimaad ama, haddii ay tahay barista cadka jarista, waxaa lagu sheegi inaad usoo laabatid isbuuc kadib. [Ka waran haddii la iisheego in aan qabo kansarka naaska?](#)

Waxaa ku daryeeli doona koox dhakhtar takhasus leh. Waxay kaala hadli doonaan wax ku saabsan cudur aqoonsashada iyo ikhtiyaarada baadhitaankaaga.

Hadaan qabo su'aalo dheeraad ah yaan waydiin karaa?

Fadlan laxidhiidh kalkaalisa daryeelka naaska haddii aad qabto su'alo dheeraad ah ama danayn kale. Faahfaahinta xidhiidhkeeda waxay ku yaalaan warqaddaada.

Ka waran haddii aan beddelo ballankayga?

Fadlan wac xarunta baadhitaanka agtaada si aad u samaysato ballan cusub.

Xarumaha baadhitaanka

Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda ee Belfast (Sidoo kale daboolaysa Hay'ada South Eastern HSC)

Xarunta Baadhitaanka

12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS Tel: 028
90333700

Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda Waqooyi

Qaybta Waqooyi ee Baadhitaanka Naaska iyo Qaybta Qiimaynta

Level A, Antrim Area Hospital 45
Bush Road, Antrim BT41 2RL Tel: 028
94424425

Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda Koonfureed

Qaybta Baadhitaanka Naaska Lurgan Hospital

Sloan Street, Lurgan BT66 8NX Tel:
02838347083

Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda Galbeed

Qaybta Baadhitaanka Naaska Ground Floor, The Nurses' Home

Altnagelvin Area Hospital
Glenshane Road, Londonderry BT47 6SB Tel: 028
71611443



Public Health Agency

Public Health Agency

12–22 Linenhall Street

Belfast

BT2 8BS

Tel: 028 9032 1313

www.publichealth.hscni.net

www.cancerscreening.hscni.net